Xeer Ikhtiyaareedka Qofka Waxyeeladu Gaadhay

Ama sharciyada uu qofka Ikhtiyaarkiisa ku dooran karo markay dhibaato ama waxyeelo gaadho:

Hadii add aaminsantahay inaad khatar deg deg ah ku sugan tahay ama kadeed lagugu hayo waxaad dalban kartaa ammar ilaalin ama ka horjoogsi deg deg ah Emergency Protective Order *(EPO). Ilaalinta deg dega ah way soconaysaa ilaa iyo arinkaaga maxkamada dhagaysanayso. Balanta dhagaysisga waxa laguu qabanayaa 14 cishoo/maalmood ka dib markii amarka ilaalada deg dega ah laguu ogolaaday. Amarka ilaalada deg dega ah waxa laguu kordhin karaa ilaa mudo sadex sanadood ah laga bilaabd markii dhagysigu dhacay.

Qaadigu wuxuu amar ku bixirkaraa:

- In aanad wax xidhiidh ah la samayn kana fogaatid masaafad fog qofka waxyeeladu gaadhay.

- Inaan wax dambe oo aflagaado ah loogaysan qofka inay meel marto.

- In uu qofka waxyeelada gaystay uu ka baxo ama ka tago wax yaabaha ay
  wadaagayeen qofka kale.
- Inaan qofka waxyeelada gaystay wax hanti ah jajabin ama daadin.

Qaadigu wuxuu amar ku bixin karaa inaan qofka waxyeeleda gaystay mudo ku meel gaadh ah caruurta loo agolaan ama laga qaado, inuu biiliyo caruurtiisa, inuu mudo gaaban caruurtiisa soo booqdo ama hamuuniyo/ la tashado wakhtiga dhagaysiga dhacayo.

Xafid ama dhig meel Qoraalada; Qor wax walba oo dhaca, maalmahay dhaceen, saacada, meelaha ay ka dhaceen iyo wakhtiyada ay dhaceen.
*Qiimo kuma joogto/ waa bilaash inuu qofku buuxiyo warqada amarka ilaalinta deg dega ah lagu dalbado (EPO).

LMHS kuma takoorto kumana cunsuriyadaso shaqad ama taageerada sababaha la xidhiidha curyaannimo , rag iyo dumar, midab, sinjiyad, diin, da', meesha uu qofku u dhashay awgeed, ama lab iyo dhedig ka qofku yahay.

Jerry E. Abraha
Duqa magaalada

Gudida Louisville iyo Agagaarkeeda

Xafiiska Dumarka Ee Louisville iyo Agagaarkeda

Kadeedka Guriga



Golaha Dowlada Ee Reer Magaalka
810 Barret Avenue, Qolka 231
Louisville, KY 40204
(502) 574-5360
(502) 574-6888 Fax
E-mail: ofw@louisvilleky.gov
Tina Lentz, Director

Kadeedka iyo Xididnimada

Kadeedka ka dhex dhaca labada qof ee xididnimada ama guri wadaaga wuxuu saameeyaa gof kasta ha ahaato, dhaqaale ahaan, diin ahaan, sinjiyad ahaan, dhaqan ahaan, labiyo dhadig ahaan iyo da' ahaanba. Hadii aad dareento in adiga ama qof aad garaynaysaa ku jiro xaalad kadeed ah, waxaanu kaa baryaynaa inaad caawimo raadsato.

Kadeedka guriga, ama kadeedka reerku waa mushkilad haysata bulshada. Maaha arin dumar ama arin rag laakiin waa arin xun oo qof walba haysata. Waxay saamaysaa reerka oo dhan, waxaanay reebtaa calaamado xun xun oo waligood sii jira.

"Kadeedka guriga iyo cadaadisku" waxay ku qeexan yihiin sharciga Kentucky (KRS 403.720) sida dhaawac jidhka, dhaawac khatar ah oo jidh ka ah, cadaadis, weerar, ama isku day dhaawac jidhka ah, dhaawac khatar ah, cadaadis ama weerar ka dhex dhaca qoyska dhexdiisa ama laba qof oo aan is qabin reerahooda.

Kadeedka labada qof ee galmadu ka dhaxayso (IPV) Intimate Partner violence waa ku dhaqaaqa fal dhaawacaya qofka xoogiisa, maskaxdiisa, galmada gofka wax indinka dhaxeeyaan. Dumarka ayaa u badan in sided ama shan goor in ka badan raga ay wax yeelo kadeed ah ka soo gaadho qofka galmada ay wadaagaam.

Tusaalayaa (IVP): Kadeedka kala gaadha labada qof ee galmada wadaaga.
Cadaadis jidhka ah- Riixid, wax ku dhufasho, laadid, qaniinyo, timaha ka jiidid, iyo qaar kaloo badan.
Cadaadis maskaxiyan ah- Hoos udhigid, magacyo ugu yeedhid ama dacaayadayn, ciyaarid "ciyaar maskaxeed", ka dhaadhicin qofku inuu waalan yahay, u sheegid qofka inuu iyada/ isaga uun jecelyahay oo aanuu qof kale jeclayn.

Cadaadis Galmo- Weerar qofka xubnihiisa taranka loo gaysto, In qofka kaa soo qaado maado galmo ama wax aan dareen lahay oo galmada uun loo haysto.

Isticmaalid Caruurta- In caruurta fariino la isugu gudbiyo iyo in dadka idin soo booqda loo isticmaalo in qofka lagu cadaadiyo, ku hanjabid ama ku caga juglay in caruurta dhaawac la goodhsiin doono.

Isticmaalid Ninnimo(Raganimo)- In qofka aad nolosha wadaagtaan aan qorshaha lagu darin mar ka go'aamo muhiim ah la gaadhayo.

Go'doon-Kaantaroolid halka/meesha ama ruuxa qofku la kulmayo iyo ciday arkayaan. Kaan taroolid jeebka qofka taasoo qofka uu ku xidhnaanayo qofkii kale ee ay nolosha wadaagayeen.

Calaamado Digniin ah oo Lagu Garto Qofka

Masayr Badan
Kontorool Badan
Lahaansho Badan
Aflagaado
Galmo Doonid Badan
Casabiyad Badan ama Xanaaq Badan
Dabeecada Qofka oo Kolba Isbedesha
Isticmaalid Khamri iyo Daroogo Badan
Xayawaanka Guriga Jooga oo La Laayo.

Talefoono Muhiim ah Booliiska Louisville iyo
Agagaarkeeda 574-2111
Caruurta Dambiga Laga galo 574-2465
Waayeelka Dambiga Laga galo 574-2278
Kadeedka Guriga/Kadeedka Xididnimada iyo
Cadaadiska Dadka Waawayn 574-2430
Golaha Dumarka Iyo Qoyaska
581-27200
Golaha Dhexe ee Arimaha Qoyska
595-0855

V.I.N.E
(502)574-8463
(502)574-2184 (Fax)
1-800-511-1670

Xafiiska Qareenka Gobolka
574-6336

Xafiiska Qareenka Barwaaqasooranka
574-6336

Emergency
911

Xeerka Ikhtiyaarka ah ee qofka waaxyeeladu gaadhay

Amar Ilaalin ama ka horgooosi deg-degah* (EPO).
I laalinta deg-dega ah way soconaysaa ilaa iyo inta arinkaaga maxkamadi ka dhagaysanayso. Balanta dhagaysiga waxaa laguu qabanayaa 14 maalmood ka dib markii amarka ilaalada deg-dega ah laguu ogolaaday. Amarka ilaalada deg-dega ah waxa laguu kordhin karaa ilaa mudo sadex sanadood ah laga bilaanbo markii dhagaysiga dhacay.
Qiimo kuma joogta/ waa bilaash inuu qofku buuxiyo warqada lagu dalbado Amarka ilaalada deg-dega ah.
Aad bay qadiyadaada u caawinaysaa inaad xafido ama dhigtid meel qoraalada, ama dokumentiyad aad ku qortay waxyaabihii dhacay sida, wakhtiqay dhaceen, meelahay, iyo waxyaabaha sababay iyo siday u dhaceen.

Isagoo adeegsanaya (EPO) qaadiga wuxuu amar ku bixin karaa:

- In aanad wax xidhiidh ah la samayn karin, kana fogaatid masaatad fog qofka wax yeeladu gaadhay.
- In ay meel marto in aan wax dambe oo aflagaado ah loo gaysan qof ka waxyeeladu gaadhay.
- In uu qofka waxyeelada gaystay ka baxo ama katago waxyaabaha ay wadaagayeen qofka kale.
- In aanuu qofka waxyeelada gaystay wax hanti ah jajabin ama daadin.

Qaadigu waxa kala oo uu amar ku bixin karaa in qofka waxyeelada gaystay mudo kul meel gaadh ah caruurta loo ogolaado, inuu soo booqan karo caruurtiisa mudo gaaban, oo qudha, inuu hanuuniyo/ la tashado caruurtiisa mudo gaaban wakhtiga dhagaysigu dhalayo.

***Wararkan ama qoraaladan sharciga ah waa sax laga bilaabo July 2001; hase ahaat ee waa la bedeli karaa mark kastoo sharciyada wax laga hedelayo.**